

Oktoobar 7, 2024

## **DCSD Waxay Xustaa Georgia Pre-K Week oo wato Dabaaldagyada Oktoobar 7-11**

*Degmada waa Bixiyaha Gobolka Ugu weyn ee Waxbarasho Pre-Kn*

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD), bixiyaha ugu weyn ee dadeynaha waxbarashada Pre-K ee Georgia, waxay ku faraxsanyihiin inay u dabaaldagaan [Georgia Pre-K Week](#) laga soo bilaabo Oktoobar 7 illaa 11. DCSD waxay ku biireysaa Waaxda Daryeelka Hore iyo Waxbarashada Georgia iyo dugsiga degmooyinka oo gobolkoo dhan ah si ay u muujiyaan shaqada aadka u muhiimsan ee barayaasheena Pre-K inta lagu jiro isbuucaan gaarka ah.

Sharci dajiyayaasha Gobolka DeKalb waxay ku biirayaan Kormeeraha guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton iyo dhawr xubnaha kooxda hogaaminta degmada si ay ugu isticmaalaan aqrinta isbuuca ee ardayda DCSD Pre-K. DCSD ayaa sidoo kale shaacisay [muuqaal](#) dabaaldaha Georgia Pre-K Week oo aqriya [proclamation](#) si loogu xuso isbuuca.

“Canuga walba, oo ay ku jiraan ilmaheena, waxay u qalmaan waxbarasho tayo leh, iyo degmadeena waxay ku faantaa inay siiyaan midaas ardaydeena Pre-K,” Dhaqtar Horton ayaa yiri. “Yoolkeena iyo masuuliyadeena waa inay ahaataa siinta ardaydoo dhan waxbarasho dhameystiran oo ku haboon oo aan siino barnaamijyo ubadkeena yar oo sare u qaado jirkooda, dabecada, iyo hormarinta garashada.”

*Georgia Pre-K Week* waxaa loo sameeyay inay ka jawaabto hoos u dhaca dhaqaale ee 2009-2010 markii Sharci dejinta Georgia uu ku dhawaad gooyay barnaamijka sabab la xiriirto arimaha maagelinta. Tan iyo markaas, Codadka Carruurta Georgia iyo Waaxda Daryeelka Hore iyo Waxbarashada Georgia ayaa abaabulay dabaaldaga isbuuc socdo ee sannadlaha oo Barnaamijka Georgia Pre-K.

*Georgia Pre-K Week* wuxuu siiyaa fursad sharci dejiyayaasha iyo hogaamada oo gobolkoo dhan si ay u booqdaan fasalooda Pre-K ee bulshadooda deegaanka, u aqriyo buugga carruurta ardayda, oo ka qeybgeliyo waxbarashada hore marka koowaad.